



MINNEAPOLIS  
PUBLIC SCHOOLS  
Urban Education. Global Citizens.

## Minneapolis Public Schools Health Related Services



### Cudur maqarka ku dhaca yeeshana Burbur iyo Qolfo jaalle ah (Impetigo)

Gacaliye Waalid/Daryeele:

Arrin la xiriirta jirrada loo yaqaanno Impetigo ayaa lagu arkay, lagana daweeeyey cunugaaga fasalkiisa. Cudurrada sida munaasibka ah loo daweeeyey la isma qabadsiiyo. Si kastaba arrintu ha ahaatee, waxaan doonaynaa inaad ogsoonaataan arrimaha soo socda:

**Sababta:** Impetigo waa jirro ay bakteeriyo maqaarka qabadsiiiso. Sida badan waxay ku dhacdaa sanko, gacmaha, lugaha iyo agagaarka afka.

**Astaamaha:** Cunugaaga ayaa kaar ama qandho maqaarka ka qabi kara. Kaarka ayaa samayn kara qolfo midab jaalle ah leh oo engaga, qabkaasi oo ku dhega maqaarka. Sida badan wuxuu ka bilawdaa maqaarka oo dillaaca. Waxayna ka bilaaban kartaa dilaac ama qaniinyo cayayaan.

Hadii cunugaaga la qabadsiiyo, waxay ku qaadan kartaa 1 ilaa 10 maalmood in astaamuhu u bilawdaan.

**Faafidda:** Adigoo taabta dheecaanka meesha kaaraysa ka imaanaya.

**Xilliga Isqabadsiiinta:** Ilaa kaarku ka biskoodo qofku ama la daweeeyey ugu yaraan 24 saac.

**Wac daryeel**

**Caafimaad bixiyahaag:** Haddii qof gurigiina joogo lagu arko astaamaha lagu garto Impetigo. Takhtarkaaga ayaa laga yaabaa inuu dawo u qoro.

**Ka reebid: Ma u baahan tahay inaad guriga joogto?**

**Haa,** haddii impetigo uu kugu xaqiijiyey daryeel caafimaad bixiyahaaga, ilaa 24 saac ee dawayn ah la dhammaystiro isla markaasna nabarku uu ka engagayo.

**Ka hortag:**

- Gacmaha dhaq kaddib marka aad taabato wax fadaraysan ama dheecaan ka yimid kaar. Cunugaaga ayaa u baahan kara in laga caawiyo gacmo dhaqashada.
- Nadiifi oo jeermiga ka dil waxyaabaha uu taabto dareeraha boogta ka yimid. Isticmaal waxyaabaha jeermiga dila.
- **HALLA WADAAGIN** shukumaannada, shukumaannada yar yar ama dharka.
- Meesha kaaraysa faashad saar. Ilmaha xasuusi ianaysan xoqin meesha kaaraysa.

Wixii cudurro ah ku soo wargali xafiiska caafimaadka dugsiga. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka wac Degmada Hennepin Waaxda Cururrada faafa lam. 612-543-5230.